# Warbixinta Golaha dowladda ee horumarinta kala-sarrayn la'aanta, sinnaanta iyo takoorid la'aanta bulshada Finnishka dhexdeeda ah

FINNISH GOVERNMENT 2023

FINNISH GOVERNMENT

# 1 Warbixinta Golaha dowladda ee horumarinta kala-sarrayn la'aanta, sinnaanta iyo takoorid la'aanta bulshada Finnishka dhexdeeda ah

Xukuumaddu waxay barnaamijkeeda siyaasadeed ku ballanqaadday qaddarinta dimuquraadiyadda, ku dhaqanka sharciga dowliga ah iyo xuquuqul-insaanka. Xukuumaddu waxay qawlqaadday horumarinta sinnaanta iyo takoorid la'aanta iyo weliba qabashada shaqo lagu yaraynayo cunsuriyadda. Xukuumaddu waxay doonaysaa in hawshaas ay ballanqaad uga hesho bulshada Finnishka ah oo dhan. Waxay dadka oo dhan qayb ka noqon karaan dhisidda Finland uu qofkasta ugu noolaal karo nabad iyo aqbalaad.

Xukuumaddu waxay baarlamaanka u gudbinaysaa warbixin sare loogu qaadayo sinnaanta iyo takoorid la'aanta. Warbixintu waxay ku qotontaa barnaalmijka xukuumadda iyo shaqadii ay xukuumadihii hore qabteen. Waxay warbixintu taageero siinaysaa shaqada xukuumadaha soo socda. Sinnaanta, takoorid la'aanta iyo baabi'inta cunsuiryaddu waxay maanta iyo berriba u baahan yihiin shaqo. Hal xukuumad dunida kama dhigi karto mid dhammaystiran. Xukuumad kasta waxaa saaran waajib ah in ay dadaasho inta karaankeeda ah.

Taariikh ahaan, awoodda Finland waxay ahayd, in iyadoo ah waddan yar ay haddana awoodday in ay dadkeedu isfahmaan. Fikradaha kala duwan waxay ahaayeen kuwa hal miis wadayaal.  Waa lagu dadaalayaa hirgelinta xoriyadda hadalka oo qiyam muhiim ah u ah bulshada dimuquraadiga ah. Waa in laga wadahadli karaa xataa arrimaha adag. Mas'uuliyad gaar ah ayaa wasiirada, xildhibaannada iyo hawlwadeennada kale ee siyaasadda taas ka saaran- ka sokow abuurista jawi wadahadal oo heer bulsho ah, waa in aan annagu is

xushmaynaa. Waa in cakirnaanta iyo iska-horimaadka bedelkooda la raadiyaa jiho dadka ka dhexeysa.

Waxaa bulshada Finnishka ah ka dhex jira fikrado iyo qaabdhismeedyo takoor ah, tusaale ahaan waxay ka jiraan suuqa shaqada iyo waxbarashada, waana in kuwaas la beddelaa. Isbeddelkaas wuxuu u baahanyahay in si daacad ah oo heer bulsho ah looga wadahadlo arrimahaas iyo waxqabadyada iyaga ka soo baxa. Diyaar ayeey xukuumaddan u tahay arrinkaas.

Warbixintu waxay xaqiijinaysaa, in golaha shacabku uu si buuxda oo baarlamaani ah uga dooddo mowqifka iyo qorshaha xukuumadda ee ku saabsan horumarinta sinnaanta, kala sarrayn la'aanta iyo takoorid la'aanta bulshada Finnishka dhexdeeda ah.

Markii la diyaarinayay warbixinta waxaa si weyn loo dhegeystay qiyaastii boqol wakiillo ah oo ka socday bulshada rayidka ah, cilmibaarayaal iyo hawlwadeennayaal kale oo muhiim ah. Iyadoo lagu salaynayo dhegeysiyada la sameeyay ayaa waxaa hogatusmoobay waxqabadyadii horay loogu heshiiyay ee ku jiray qorshaha xukuumadda. Labo qaybood ayaa warbixinta loo qaybiyay, kuwaas oo tan koowaad ay ka qisoonayso sharraxaysana mowqifka xukuumadda qaybta kalana waxay si la taaban karo u furfuraysaa waxqabadyada xukuumadda. Diiradda ugu weyn ee warbixintu waxay ku wajahantahay ka hortagga cunsuriyadda aragtiyada kale ee ku saabsan sinnaantana si kooban ayaa looga hadlayaa. Warbixinta waxaa si la taaban karo loogu caddaynayaa barnaamij waxqabad.

Xukuumaddu waxay micnaha cunsuriyadda u fahamsantahay sidan soo socota:

Cunsuriyaddu waxay ku salaysantahay  shakhsiyaad ama kooxo dad ah oo lagu qeexo ama sifeeyo in ay dadka kale ka darajo hooseeyaan tusaale ahaan iyadoo loo cuskanayo asalka jinsiysadeed, midabka, dhalashada, dhaqanka, afka hooyo ama diin. Cunsuriyaddu waxay bulshada uga dhex muuqan kartaa sidii nidaamyo ama waxqabadyo wax takooraya oo kale, tusaale ahaan marka lagu jiro nolosha shaqada. Cunsuriyaddu waxay shakhsiyaadka iyo kooxaha dhexdooda uga soo muuqan kartaa sidii habdhaqan takoor ah. Iska sii necbaanshaha iyo ka cabshada dadka aan la aqoon ama ajnabiga ah ayaa cunsuriyadda u noqon karaa meel ay ku korto. Cunsuriyaddu waxay abuurtaa sinnaan la'aan waxayna waxyeelleysaa ka sokow qofka la cunsuriyeeyay, bulshada oo dhan.

## 1.1 Sharciga degsan ee Finland waa mid guud ahaan heerkiisu fiicanyahay

Sharciga degsan ee Finland wuxuu aasaas sharciyeed oo wanaagsan siinayaa horumarinta sinnaanta. Finland waxay taariikhda ku gashay oo ay horseed u ahayd wanaajinta sinnaanta bulshada, sharciga dowladeed iyo nolosha bani'aadminimo ee qofka shakhsiga ah. Dhaxalkaas ayaa waajib ahaan xukuumadda xeerinaya marka ay ku jirto shaqadeeda kala sarrayn la'aanta iyo sinnaanta.

Sida uu qabo dastuurku, dadku waa kuwa sharciga u simman. Haddii aanay jirin sabab la aqbali karo, qofna looma gelin karo heer dadka kale ka duwan iyadoo lagu salaynayo jinsigiisa, da'diisa, asalkiisa, luqaddiisa, diintiisa, waxa uu aaminsanyahay, aragtiiisa, xaaladdiisa caafimaad, naafannimadiisa ama sababo kale oo qofka la xiriira. Waxaa kale oo uu dastuurku sheegayaa, in dadka dhulka loogu yimid ee Saame la yiraahdo iyo Roomaaniyiinta iyo kooxaha kale ay xaq u leeyihiin gacan ku haynta iyo horumarinta luqaddooda iyo dhaqankooda. Awoodda dowliga ah waa in ay sugtaa hirgelinta xuquuqaha aasaasiga ah iyo xuquuqda bani'aadamka.

Heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda bani'aadamka ee ay Finland u hogaansanto iyo dastuurka dalka ayaa dadka oo dhan u dammaanad-qaadaya xaqa ay u leeyihiin sinnaanta, taasina kuma xirna kooxda ama dadka laga tirada badanyahay ee laga yaabo in uu qofku ka tirsanyahay. Dadka ka tirsan kuwa laga tirada badanyahay waa in loo dammaanad-qaadaa fursad ay si sinnaan ah qayb uga noqdaan – waxbarashada, nolosha shaqada iyo bulshadaba. Dadka dalka u badan iyo kuwa laga tirada badanyahayba waxay leeyihiin xuquuqda aasaasiga ah iyo tan bani'aadamka.

Sharciga sinnaanta ayaa mamnuucaya takoorka ku salaysan jinsiga, sharciga kala sarrayn la'aantuna wuxuu mamnuucayaa takoorka ku salaysan sababaha kale ee qofka la xiriira. Waxaa dhowaan la faahfaahiyay sharcigan, si tusaale ahaan loo xoojiyo wax-ka-qabashada takoorka nolosha shaqada. Waxaa intaas dheer in horumarinta kala sarrayn la'aanta, sinnaanta iyo takoorid la'aanta lagu qeexayo sharciyo iyo qaanuuno kale oo badan. Sharciga dembiyada ayaa mamnuucaya takoorka ku salaysan tusaale ahaan isirka qofka ama diinta wuxuuna sugayaa ammaanka diinta, taas oo suuraggelinaysaa tusaale ahaan mamnuucidda in si caam ah loo gubo kitaabka Quraanka iyo Baaybalka.

Waxay sidoo kale xukuumaddu u aragtaa in iyadoo cuskanaysa wareegyada dhegeysiga, in sharcigeenna degsan uu guud ahaan yahay mid heerkiisu fiican yahay. Cilladaha ka muuqda hirgelinta sinnaanta dadka waxay ku salaysanyihiin inta badan hirgelinta iyo ilaalinta kala dhimman ee sharciga degsan. Waxqabadyada xukuumaddu waxay xoogga saarayaan waxqabadyada lagu horumarin karo hirgelinta sinnaanta iyo kala sarrayn la'aanta. Si kastaba ha ahaatee, waxaa iska cad in sharciga degsan ay ku jiraan meelo aan badnayn oo u baahan in la horumariyo.

## 1.2 Finland waxay shaqadeeda Midowga Yurub iyo tan caalamiga ah ku sii wadaysaa aragtideedi wakhtiga dheer socotay

Midowga Yurub waa qiyamka bulsho iyo tixraaca dhaqaalaha ee ugu muhiimsan ee Finland. Qiyamyada aasaaska u ah Midowga waxaa lagu qeexayaa qodobka 2aad ee heshiiska lagu sameeyay Midowga Yurub (SEU). Qiyamyadaas waa xurmaynta sharafta bani'aadamka, xorriyadda, dimuqraadiyadda, sinnaanta, xurmaynta dowladda qaanuuniga ah iyo xuquuqda bani'aadamka, iyo weliba xuquuqda dadka laga tirada badanyahay.

Finland waxay dhaqangelisay sharciga degsan ee Midowga Yurub ee horumarinaya kala sarrayn la'aanta. Waxaa Midowga Yurub hadda looga wadahadlayaa xoojinta sharciga degsan ee sinnaanta. Amarka rasmiga ah ee siinnaanta, amarada rasmiga ah ee khuseeya hay'adaha sinnaanta iyo soojeedinnada xeerarka ee khuseeya aqoonsashada waalidnimada ayaa la diyaarinayaa. Finland waxay si firfircooni ah saamayn ugu yeelanaysaa waxyaabaha ku qoran arrimahan soo socda waxayna fiiro u yeelanaysaa himilooyinka xukuumadda si loo xoojiyo saamaynta Midowga Yurub.

Go'aanka guud ee Midowga ee kahortagga cunsuriyadda iyo ajnebi nacaybku wuxuu bixinayaa fareemyo guud. Waxaa intaas dheer oo la hirgelinayaa istaraatijiyado badan oo xoojinaya kala sarrayn la'aanta iyo shaqooyinka looga soo horjeedo cunsuriyadda. Waxay kuwaani ku jiraan qorshaha waxqabadka ee kahortagga cunsuriyadda ee Midowga Yurub ee 2020-2025, qorshaha waxqabadka ee khuseeya xuquuqda bani'aadamka iyo dumuquraadiyadda ee 2020-2024, istaraatijiyada ka baaraandegaysa dadka jinsi ahaan iyo sekshuwaal ahaan laga tirada badan yahay (HLTBIQ) ee 2020-2025 iyo istiraatijiyada kahortagga Yuhuud nacaybka ee 2021-2030. Guddigu

wuxuu dalalka xubnaha ka ah ku boorrinayaa in ay samaystaan istiraatijadu qaran oo u gaar ah. Midowga Yurub ayaa sidoo kale leh nidaamyo maalgelinneed oo badan oo ay Finland shaqadeeda uga faa'iidaysatay.

Sida uu qabo xafiiska cuquuqda aasaasiga ah ee Midowga Yurub, cunsuriyaddu waxay sannadkii 2022 ahayd mid weli dhibaato xooggan ku heyso Midowga Yurub oo dhan.[1] Warbixinta Midowga Yurub ayaa muujisay welwel ku saabsan hadalka cadaawadda ah ee ka dhacaya shabakadda internetka.

Finland waxay si aan isbedbeddel lahayn uga tirsanayd inta xukuumaddan ay shaqaynaysana uga tirsantahay kooxda wadamada Midowga Yurub ee dhista Midow sinnaanta dadka lagu horumarinayo cunsuriyaddana looga hortegayo. Finland waxay xoojinaysaa sinnaanta jinsiyada, horumarinta sinnaanta iyo takoorid la'aanta iyo shaqada looga hortegayo cunsuriyadda ee waxqabadka bannaanka ee Midowga Yurub.

Finland waxay qayb muhiim ah ka tahay heshiisyada xuquuqul insaanka ee Qaramada Midoobay iyo Golaha Yurub waxaana heshiisyadaas dartood waajib ugu ah in si simman oo aan cidna lagu takoorayn ay u xushmayso, ilaaliso una dhaqangeliso dhammaan xuquuqaadka bani'aadamka. Heshiisyadu waxay ku salaysan yihiin mabaa'diida sinnaanta iyo takoorid la'aanta ee dadka[2]. Heshiisyadu waxay sidoo kale qeexayaan xuquuqda ugu yar ee uu leeyahay shakshiga ama qayb bulshada ka mid ah. Badbaabada ugu fiican waxaa lagu bixin karaa xuquuqda aasaasiga ee qarameed iyo sharciga degsan. Finland waxay wakhtiga loo qabto ee cayiman ku gudbisaa warbixinta dhaqangelinta xuquuqda bani'aadamka waxayna talooyin iyo soojeedinno ka heshaa hay'adda ilaalinta heshiiska ee madaxa bannaan.

Soojeedinnada ay Finland heshay xilliyadan dambe ee khuseeya mowduuca warbixintan waxay ku jiraan arrimahan soo socda:

- xoojinta fareemka sharci iyo inistituushan ee kahortagga takoorka; kordhinta iyo horumarinta waxbarashada fahamka xuquuqda bani'aadamka, barashada fahamka sinnaanta iyo barashada fahamka ogaanshaha jinsiga;

[1] https://fra.europa.eu/sites/default/files/fra_uploads/fra-2023-fundamental-rights-report-2023-opinions_en.pdf
[2] https://um.fi/ihmisoikeussopimukset-ja-raportit

- kahortegidda khaniis ka didista, jinsifaquuqa, cadaawad u haynta dumarka iyo hadalka cadaawadda ah ee jinsiyada u dhexeeya ee looga hortegayo internetka iyo meelaha ka baxsan;
- caqabadaha iyo dhibaatooyinka ka jira hirgelinta sinnaanta dhabta ah ee nolosha shaqada; iyo
- takoorka ku jira qaab-dhismeedka bulshada, kaas oo lagu arko, sida xoog sheegashada dumarka ka dhanka ah iyo takoorka lagu sameeyo dadka ka tirsan Saamiyiinta, Roomaaniyiinta, dadka naafada ah, dadka laga tirada badan yahay ee dhinaca jinsiga. Mararka qaar, sababaha takoorka ayaa ah kuwa is diiddan, sababahaasna waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa.

Kahortagga hadalka cadaawadda ah ayaa soojeedinnada ugu dambeeyay aad uga muuqday.

Siyaasadda Finland ee dibadda iyo ammaanka waxaa aasaas ah u mabada'a dowlad qaanuun ku dhisan, xuquuqda bani'aadamka, sinnaanta iyo dimuquraadiyadda. Xukuumaddu waxay shaqadeeda heer caalami ah ku sii wadaysaa aragtideeda wakhtiga dheer ee lagu sharraxay warbixinta siyaasadda xuquuqda bani'aadamka[3]. Waxaa halkaas carabka loogu adkaynayaa xoojinta kala sarrayn la'aanta, sinnaanta jinsiyada iyo xuquuqda ka qaybqaadashada.

Finland waxay illaa iyo dhammaadka sannadka 2024 xubin ka tahay Golaha Xuquuqda bani'aadamka ee QM waxayna guddoomiye ka tahay sannadka 2025 Hay'adda iskaashiga iyo ammaanka Yurub (Etyj) iyo Golaha wasiiradda ee Wadamada Woqooyiga Yurub. Kaalimahan caalamiga ah ayaa abuuraya fursado wadashaqayn saamayn lagula yeelan karo horumarinta iyo ilaalinta xuquuqda bani'aadamka.

3 http://urn.fi/URN:ISBN:978-952-383-637-2

## 1.3 Mabda'a xukuumadda iyo barnaamijka xukuumadda

Barnaamijka xukuumaddu waa barnaamij isbeddel oo mabaadii'da udub-dhexaadka ah ay yihiin, in ganacsiga iyo shaqo qabashadu ay yihiin kuwa faa'iido iyo abaalmarin leh. Shaqo qabashadu waa qayb kamid ah laqabsashada dalka ee miradhalka ah. Dib u habaynta suuqa shaqada iyo dabinnada dhiirrigelineed oo meesha laga saaro ayaa sare loo qaadayaa heerka shaqaaloobidda ee dhammaan qaybaha bulshada. Waxaa loo arkaa dadka soogalootiga ah iyo dadka asal ahaan ka soo jeeda dadka soogalootiga in ay yihiin hawlwadeenno noocyo badan oo firfircoon. Qofkasta oo Finland deggan waxaa ka sokow xuquuqda uu leeyahay waajib ka saaranyahay ka qaybqaadashada dhismaha bulshada.

Xukuumaddu waxay qawlqaadday in ay si ballaaran u horumarinayso sinnaanta kooxaha kala duwan iyo shakhsiyaadka. Lama aqbali karo wax takoor ah. Ma ahan in cunsuriyadda boos laga siiyo ama ay meel ka soo gasho Finland.

Xukuumaddu waxay si waafaqsan mabaadii'da wadajirka loogu qoray barnaamijka xukuumadda wax uga qabanaysaa sinnaanta iyo takoorid la'aanta. Innaba loo dulqaadan maayo cunsuriyad marka lagu jiro shaqada xukuumadda. Xukuumadda iyo wasiir kasta oo ka tirsan waa in ay beri ka noqdaan cunsuriyadda waana in ay ka soo horjeestaan dhammaan noocyada fikradaha xagjirka ah, waa in ay sidoo kale ballanqaadaan marka ay shaqadooda ku jiraan in ay si firfircooni ah uga hortegayaan cunsuriyadda gudaha Finland iyo heer caalamiba.[4]

Barnaamijka xukuumaddu wuxuu sidan soo socota u go'aaminayaa sinnaanta:

---

[4] https://valtioneuvosto.fi/-//10616/hallituspuolueiden-puheenjohtajien-julkilausuma-11.7.2023

Finland waxay horumarinaysaa hirgelinta dimuquraadiyadda, mabada'a dowlad qaanuun ku dhisan iyo xuquuqda aasaasiga ah iyo tan bani'aadamka. Bulsho kalsooni qabta iyo xiriirka dadka ee wanaagsan waxay dhalanayaan, marka qofkasta oo Finland joogo uu ku kalsoonyahay hirgelinta xuquuqdiisa, sinnaanta dadka kala jinsiga ah iyo sinnaanta loo simanyahay sharciga, takoorid la'aanta iyo fursadda uu saamayn kula yeelan karo jihada ay noloshiisu u socoto.

Xukuumaddu waxay si qorshe iyo qasad leh uga shaqaynaysaa sidii loogu horumarin lahaa bulshada dhexdeeda kala sarrayn la'aanta, sinnaanta iyo takoorid la'aanta. Qofkasta wuxuu xaq u leeyihiin in uu gudaha Finland ku dareemo nabadgelyo aan ku xirnayn asalkiisa.

Dadka oo dhan sharciga waa u simman yihiin. Qofna looma takoori karo jinsigiisa, da'diisa, asalkiisa qolonimo ama ummadeed, jinsiyaddiisa, luqaddiisa, diintiisa iyo waxa uu aaminsanyahay, aragtiiisa, naafannimadiisa xaaladdiisa caafimaad, jihaysigiisa jinsiyeed ama sababo kale oo qofka la xiriira.

Ka sokow qaybaha kor lagu soo sheegay waxaa jira qoraallo badan oo faahfaahsan, kuwaas oo warbixinta la xiriira. Tusaale ahaan, si loo kordhiyo ka qaybqaadashada nolosha shaqada ee kooxaha ay matalaaddoodu hooseyso marka nolosha shaqada laga hadlayo sida dadka naafada ah, Roominiiyinta, kooxaha dadka soogalootiga ah ee kala duwan iyo dumarka asal ahaan soogalootiga ah waxaa la hirgelinayaa barnaamij waxqabad ah. Sidaas si lamid ah, waxaa tusaale ahaan hadafka xoojinaya hirgelinta sinnaanta xuquuqda aasaasiga ah ee cilmiga ee carruurta oo dhan laga helayaa barnaamijyada xukuumadda. Waxaa kale oo barnaamijka lagu qoray, in xuquuqda is-maamulka iyo xuquuqda aasaasiga ah ee dadka naafada ah iyo sinnaantaba la tixgeliyo marka go'aan laga gaarayo inta ay nool yihiin oo dhan waana in sidoo kale habsami-socodka nololmaalmeedka la sugaa marka adeeygyada la qorshaynayo. Dhammaan qoraallada la xiriira mowduucan ee barnaamijka xukuumadda ku jira si faahfaahsan looguma tixin ama sharrixin warbixinta. Xukuumaddu waa fahamsantahay xaaladaha kala duwan ee magaalooyinka iyo deegaannada. Wadahadallada ku saabsan horumarinta takoorid la'aanta oo ay ku jirto kahortagga kala soocidda dadka waxay ka sii soconayaan shabakadda magaalooyinka.

Xukuumadda waxay dejinaysaa barnaamij sinnaan ah oo maamul ahaan aan hal deegaan ama magaalo ku koobnayn. Waxaa mabaadii'diisa lagu cusboonaysiinayaa laguna horumarinayaa himilooyinka wadajirka ah ee warbixinta[5] siyaasadda qiyamka. Xukuumaddu waxay sii wadaysaa kahortagga xoog-sheegashada ka dhanka ah dumarka. Tani waa mid kamid ah dhibaatooyinka ugu waaweyn ee dhinaca sinnaanta ee Finland ka jirta. Dhibaatooyinka sinnaanta ee ku dhaca wiilasha iyo ragga waxaa si waafaqsan barnaamijka xukuumadda loogu yeelanayaa fiiro intii hore ka badan, si looga hortago takoormidda ragga dhallinyarada ah. Waxaa kale oo la diyaarinayaa ama la dhaqangelinayaa barnaamijyo kale oo badan, kuwaas oo xiriir la leh horumarinta kala sarrayn la'aanta iyo sinnaanta, tusaale ahaan Barnaamijka da'da ee qarameed, kaas oo sidii hore si ka xooggan fiiro loogu yeelanayo takoorka da'da ku salaysan.

## 1.4 Xukuumaddu waxay shaqadeeda uga faa'iidaysanaysaa barnaamijka waxqabadka ee Finland loo Simmanyahay

Qorshaha waxqabadka ee kahortagga cunsuriyadda ee Midowga Yurub waxaa lagu doonayay barnaamijyo waxqabad oo heer qarameed ah. Barnaamijkan waxqabadku wuxuu Finland diyaar ka noqday sannadkii 2021 waana Finland loo Simmanyahay[6]. Barnaamijku wuxuu ku salaysanyahay qiimeyn xaaladeed, taas oo lagu saleeyay siddeed hadaf iyo 52 fal oo waxqabad ah. Waxqabadyadu waa kuwa ku dhowaad si buuxda u hirgalay, laakiin hadafyada ayaa weli ah kuwa taagan.

Dhegeysiyadii la sameeyay markii la diyaarinayay warbixintan ayaa waxaa si joogto ah uga soo baxayay aragtiyadan soo socda:

- Burburinta qaab-dhismeedyada bulshada ee liddiga ku ah sinnaanta dadka marka lagu jiro suuqa shaqada iyo meelaha kale ee bulshada,
- xoojinta xiriirka wanaagsan ee dadka,
- muhiimadda gelitaanka suuqa shaqada,

[5] http://urn.fi/URN:ISBN:978-952-383-590-0
[6] http://urn.fi/URN:ISBN:978-952-259-813-4

- baahida loo qabo xoojinta seeska aqoonta khuseysa cunsuriyadda iyo weliba
- baahida wax ka beddelista sharciga degsan oo iyana waxyar laga soo jeediyay.

Xukuumaddu waxay shaqadeeda u cuskanaysaa shaqada lafagurka ama baaritaanka ah ee ballaaran ee la sameeyay markii la diyaarinayay barnaamijka waxqabadka ee Finland loo Simmanyahay iyo barnaamijka himilooyinka oo samayntiisa taas lagu saleeyay. Qiimeynta ayaa laga sameeyay barnaamijka waxqabadka. Sida ku cad qiimeynta, ma ahan in maalgelinta barnaamijka waxqabadku ay noqoto mid ku tiirsan maalgelin qaab mashruuc ah ee waa in hoggaanka siyaasaddu uu u qoondeeyo dhaqaale ku filan. Miisaaniyad lacageed oo aad u yar ayaa loo qoondeeyay barnaamijkii waxqabadka ee xukuumaddii hore.

# 2 Waxqabadyada xukuumadda

Xukuumaddu waxay diyaarinaysaa sii wadista barnaamijka waxqabadka ee Finland loo Simmanyahay oo ku salaysan barnaamijka xukuumadda. Xafiiska ra'iisal wasaaraha iyo Golaha Xukuumadda ayaa hoggaaminaya dejinta barnaamijka, iskuduwidda waxqabadyada iyo la socoshadooda. Xukuumaddu waxay dhaqaale ku filan u leexinaysaa waxqabadyadan marka lagu jiro wadaxaajoodka miisaaniyadda qaybteeda kharashaadka baxaya.

Barnaamijka waxaa la dejinayaa iyadoo lagu xisaabtamayo qorshaha waxqabadka Midowga Yurub ee kahortagga cunsuriyadda ee 2020–2025. Xukuumaddu waxay xaaladda iyo baahida loo qabo sii wadista waxqabadka ku qiimaynaysaa shir-miisaaniyadeedka dhexe ee sannadka 2025. Waxaa shaqada la sii wadayaa iyadoo si ballaaran looga qaybqaadanayo waxaana hawshaas looga faa'iidaysanayaa wareegyadii dhegeysiga ahaa ee la sameeyay markii la diyaarinayay warbixintan. Barnaamijka waxqabadka ee sii socda waxaa ku jira waxqabadyo ay kamid yihiin kuwaan soo socda:

## Dareenka guud ee bulshada iyo wadahadalka, kordhinta ogaanshaha, xiriirka wanaagsan ee dadka u dhexeeya

1. Xafiiska Golaha xukuumadda ee ra'iisal wasaaraha hoostaga ayaa waxaa lagu ururinayaa aqoonta kahortagga takoorka. Hadafku waa xoojinta wadashaqeynta iyo abaabulka u dhexeeya hay'adaha iyo hawlwadeennada kale ee sinnaanta horumariya. Seeska macluumaadka ee khuseeya sinnaanta iyo cunsuriyadda waa la wanaajinayaa.
2. Waxaa la billaabayaa wadahadal bulsho oo uu ra'iisal wasaaruhu guddoominayo oo sannadle ah, kaas oo looga hadlayo horumarinta sinnaanta iyo takoorid la'aanta.
3. Waxaa la billaabayaa ololе uu xafiiska golaha xukuumaddu hoggaaminayo oo looga soo horjeedo cunsuriyadda. Waxaa ololaha lala hirgelinayaa ururada shaqaalaha iyo shaqabixiyayaasha, ururada isboorti, dhaqanka iyo bulshada.
4. Shaqada Guddiga talabixinta xiriirka bulshooyinka kala duwan (ETNO) iyo guddiyada bulshooyinka kala duwan ee heer gobol ayaa waxaa laga xoojinayaa qaybta horumarinta xiriirka wanaagsan ee dadka.
5. Waxaa la xoojinayaa wadahallada lala yeelanayo ururada bulshada. Si waafaqsan barnaamijka xukuumadda ayeey xukuumaddu u diyaarinaysaa istaraatijiyada ururada bulshada iyo qorshaha dhaqangelinteeda.

6. Xukuumaddu waxay si xooggan uga hortegaysaa hababka waxqabadka ah ee lagu kordhinayo takoorka, cadaadiska, nacaybka ama xoog ku muquuniska ku salaysan asalka laga soo jeedo, dhalashada, diin ama astaamo kale oo kuwaan u dhigna, kuwaas oo ka dhan ah shakhsi ama koox.
7. Si waafaqsan barnaamijka xukuumadda ayaa xoogsheegashada sharafta la xiriirta loo aqoonsanayaa loogana hortegayaa.
8. Qashqashaadda iyo cadaadiska nidaamka ku dhisan ee mas'uuliyiinta, garsoorayaasha iyo hawlwadeennada kale ee guud waa laga hortegayaa waxaana la xaqiijinayaa, in taageero ku filan la siiyo dadka ay dhibaatooyinkaas ku dhaceen. Tani waxay khusayn kartaa tusaale ahaan ficillada shaqabixiyaha, haddii xil ama hawl darteed ay qashqashaadda iyo cadaadisku ugu wajahan yihiin qof shakhsi ah.
9. Waxaa la xoojinayaa shaqada booliska ee kahortagga dembiyada waxaana la horumarinayaa waxqabadka Ankkuri ee xirfadaha badan ka kooban iyadoo laga dhigayo mid sidii hore ka ballaaran kana shaqo badan. Si loo yareeyo dembiyada dhallinyarada iyo kooxaha gaangiska ah, waxay xukuumaddu shaqadeeda soo socota ku hirgelinaysaa waxqabadyo hawshaas si gaar ah u khuseeya. Shaqadan waxay u baahantahay aqoon xirfado badan ku salaysan.

## Nidaamka waxbarashada iyo barbaarinta iyo siyaasadda dhaqanka, jimicsiga iyo dhallinyarada

10. Barnaamijka sinnaanta oo qayb ka ah waxqabadka heer degmo iyo dowladeed ayaa waxaa lagu billaabayaa barnaamij lagu horumarinayo sinnaanta iyo kala sarrayn la'aanta oo nidaamka waxbarashada oo dhan daboolaya 2024-2025. Waxaa barnaamijka lagu taageerayaa sidii qorshayaasha sinnaanta iyo kala sarrayn la'aanta ee ay hadda isticmaalaan goobaha waxbarashadu loogu fidin lahaa islamarkaasna looga dhaqangelin lahaa nololmaalmeedka caadiga ah ee barbaarin-horaadka iyo goobaha waxbarashada.
11. Si waafaqsan barnaamijka xukuumadda ayaa waxaa kor loo qaadayaa heerka ka qaybgalka barbaarin-horaadka ee cauurta asalkoodu soogalootiga yahay, sababtoo ah waxay taasi taageereysaa laqabashada dalka iyo barashada luqadda ee qoyska oo dhan. Waxaa la joogtaynayaa heerka lacagta cayiman ee maalgelinta sinnaanta ee loo isticmaalo barbaarin-horaadka iyo waxbarashada aasaasiga ah.

12. Xukuumaddu waxay hirgelinta kala sarrayn la'aanta, takoorid la'aanta iyo sinnaanta iyo weliba xuquuqda bani'aadamka ku xoojinaysaa waxqabadyada laamaha jimicsiga, isboortiga, dhaqanka iyo dhallinyarada. Xukuumaddu waxay hoosta ka xarriiqaysaa sidii dadka soogalootiga ah, naafada iyo dhallinyarada kale ee ka tirsan kooxaha laga tirada badanyahay ay waxqabadka qayb uga noqon lahaayeen. Si waafaqsan barnaamijka xukuumadda ayaa loo xoojinayaa loona ballaarinayaa waxqabadka-Kaligaa ma tihid.

## Sinnaanta iyo takoorid la'aanta nolosha shaqada

Barnaamijka xukuumadda waxaa ku jira qoraallo badan oo nolosha shaqada la xiriira. Mowqifku waa in Finland lagula qabsanayo shaqo qabasho.

13. Ururada shaqaalaha iyo shaqabixiyayaasha ayaa lala horumarinayaa takoorid la'aanta, noocyo badnaanta iyo fursadaha u sinnaanta nolosha shaqada. Waxaa la xoojinayaa u sinnaanta fursadaha. Waxaa adeegyada shirkadaha lagu darayaa tusaale ahaan adeegyo horumarinaya hoggaaminta noocyada badan kana hortegaya takoorka shaqaalaynta.
14. Waxaa la horumarinayaa in dumarka soogalootiga ah ay suuqa shaqada u wareegaan iyadoo la adeegsanayo waxqabadyo yaraynaya fikradaha la qabatimay ee nolosha shaqada iyo jiheynta mihnadda shaqo ee laga heysto jinsiga iyo isirka dadka iyo waxqabadyo horumarinaya sinnaanta ka jirta qoysaska dhexdooda.
15. Waxaa la wanaajinayaa fursadaha ay maamulladu ku taageeri karaan nolowanaagga shaqaalahooda la kulma takoorka iyo cunsuriyadda tusaale ahaan iyagoo shaqaalahaas siinaya taageero kana faa'iidaysanaya shabakadda iyo tababarada kale ee xrfadlayaasha loogu talaggalay.

## Mashaariicda sharci dejinta iyo gungaarka

16. Si waafaqsan barnaamijka xukuumadda ayaa illaa iyo dhammaadka sannadka 2025 loo sii wadayaa shaqada guddiga xaqiiqada iyo heshiiska ee khuseeya dadka Saamyiinta ah. Shaqada guddiga dhegoolayaasha iyo dadka isticmaala luqadda dhegoolayaasha waa la hirgelinayaa. Hindisaha xukuumadda ee ku saabsan Ismaamullada Saamiyiinta waxaa si waafaqsan barnaamijka xukuumadda loo soo gudbinayaa iyadoo lala shaqaynayo Ismaamullada Saamiyiinta ugu dambeyn dhammaadka sannadka 2023.
17. Si looga hortago ka faa'iidaysashada ama khalad ah u isticmaalidda shaqaalaha, waxaa si waafaqsan barnaamijka xukuumadda aad loo adkaynayaa ciqaabaha ka dhasha xukunnada tagrifalka waxaana la xoojinayaa ilaalinta arrintaas.
18. Waxaa laga hortegayaa falalka nacaybka ah ee loo geysto Yuhuudda, Muslimiinta, Kirishtaanka iyo koox dimeedyada kale. Dembi ayaa laga dhigayaa mamnuucista gummaadkii ama holokawstigii Yuhuudda. Waxaa loo guntanayaa in hab waafaqsan nidaamka caalamiga ah loo xuso maalinta xuska dhibbanayaasha cadaadiska. Waxaa laga salgaarayaa fursadaha ugu yaraan dembi looga dhigi karo isticmaalka astaamaha naasiga iyo shuuciyadda, marka isticmaalka astaamahaas la doonayo in lagu gaaro horumarinta qaddiyadahaas.

## Waxqabadyada Golaha dowladda iyo maamulka

Golaha dowladdu wuxuu xoojinayaa shaqadiisa si uu u horumariyo kala sarrayn la'aanta, sinnaanta iyo takoorid la'aanta iyo si uu u xoojiyo ilaalinta arrimahaas.

19. Xukuumaddu waxay sannad kasta ka baaraandegeysaa xalalka, go'aannada iyo soojeedinnada ay ururada ilaalinta xuquuqda bani'aadamka ee caalamiga ah siiyaan Finland kaddibna waxay go'aan ka gaaraysaa waxa ay arrimahaas ka qabanayso.

21. Finland waxay xiriirkeeda caalamiga ah ee wakhtiga dheer ku sii wadaysaa mowqifkeeda ku aaddan siyaasadda xuquuqda bani'aadamka, si ay tusaale ahaan u horumariso una difaacdo xuquuqda dumarka, gabdhaha, dadka naafada ah, dadka asal ahaan dhulka loogu yimid, dadka jinsi iyo sekshuwaal ahaan laga tirada badan yahay iyo dadka kale ee ku jira xaalad nuglaan ah. Finland waxay xataa si waafaqsan mowqifkeeda kor lagu soo sheegay gudaha Midowga Yurub uga sii wadaysaa horumarinta arrimaha khuseeya sinnaanta dadka oo ay ku jirto xuquuqaadka is maamulka qofka (SRHR)  iyo dadka jinsi iyo sekshuwaal ahaan laga tirada badan yahay.
22. Waxaa la xoojinayaa aqoonta shaqaalaha laamaha waxbarashada iyo nolowanaagga ee khuseysa kala sarrayn la'aanta, sinnaanta jinsiyada iyo takoorid la'aanta.
23. Si loo kordhiyo ogaanshaha hoggaanka siyaasadda iyo mas'uuliyiinta, ayaa waxaa laga faa'iidaysanayaa tababarka kala sarrayn la'aanta iyo sinnaanta. Kala sarrayn la'aanta iyo sinnaanta waxaa lagu horumarinayaa natiijada habraaca hoggaaminta ama hagitaanka.
24. Golaha dowladdu wuxuu shaqabixiye ahaan fiiro gaar ah u yeelanayaa fursadaha iyo noocyo badnaanta loo simman yahay, tusaale ahaan marka lagu jiro qaadashada shaqaalaha iyo ogeysiisyada shaqooyinka bannaan. Hadafku waa in dadka ka tirsan kooxaha kala duwan ee laga tirada badan yahay loo abuuro shuruudo loo simmanyahay marka shaqo doonista lagu jiro. Si waafaqsan barnaamijka xukuumadda ayaa looga faa'iidaysanayaa macluumaadyada ka soo baxay tijaabooyinka shaqaalaynta ee magaca dadka la qariyay.